


Aqoonsashada geed dambaseedka (ash)



Dhammaan geeda dambaseedyada (ash) waxaa weerar ba'an ku haya cayayaanka 'emerald ash borer' oo ah cayayaan soo weerara sidoo kalena dila geed dambaseedka (ash). Barashada qaabka lagu aqoonsado geed dambaseedka ayaa ah tallaabada ugu hore.

Raadi sifooinka soo socda si aad u xaqijiso in geedkaaga uu yahay geed dambaseed (ash) iyo in kale:



Laamo ukala baxa
laba jiho oo iska soo
horjeeda



Caleemo balaaran ama
caleemo badan oo hal
jirid ku yaal



Jilif u sameysan
qaabka dheemanka



Miro u eg seebka doomaha
oo sida caadiga ahna rucub
rucub u soo laalaada

Haddii geed dambaseed (ash) uu ku yaallo gurigaaga, baro qaababka aad ku badbaadin karto geedkaaga ama talooyin ku saabsan jarista iyo dib u abuurista geedka ka hel barta hennepin.us/ashtrees



Maalgelinta jarista geedaha

Horraantii sanadkan 2024, Hennepin County waxa la siiyay 10 milyan oo doollar oo ah maalgelin ka timid wakaalada U.S. Forest Service taasoo loogu talagalay in lagu jaro geedaha buka, in lagu abuuro geedo kale, in dadka deegaanka lagu wacyigeliyo, iyo in lagu taageero ganacsiyada iyo horumarinta shaqaalaha. Shaqada mashruucan waxay sii socon doontaa ilaa Janaayo 2029. Hennepin County waxay milkiilayaasha guryaha ee dakhligoodu yar yahay ku caawin doontaa in laga jaro loona beddelo geedaha guryahooda ku yaala. Codsiyada jarista geedaha waxaa la aqbali doonaa laga bilaabo Juun 2024.



Booqo beheardhennepin.org/urban-community-forestry si aad su'aalo u weydiiso, si aad u rukumato barta, iyo si aad u hesho agabka codsiga.

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay

Maalgelinta uu bixiyo sharciga dhimista sicir bararka iyo USDA Forest Service